



Daawadaada suuxdinta ee qalinnada waaweyn

Qofka ay uqorsheysantahay inuu galo
Waaxda Daryeelka Dheeriga ama ICU-
ga qaliinka kadib.

Buug-yarahan waxaa loogu talagalay qof kasta oo gali raba qalliin weyn oo lagu wargeliyay inay u badan tahay inay u baahdaan inay ku sii jiraan qaybta ku-tiirsanaanta sare (HDU) ama qaybta daryeelka xooggan (ICU) qalitaankooda ka dib. Waxaana qoray dhakhaatiir suuxiyeyaal ah oo khibrad u leh suuxdinta maxalliga ah, bukaannada iyo wakiillada bukaannada, ayagoo wada shaqaynaya.

Hordhac

Buug -yarahan waxaa ku qoran macluumaad ku saabsan waxa dhici doona qalliinka ka hor, noocyada kala duwan ee suuxinta iyo ikhtiyaarrada xanuun baabiiyeyaasha, iyo waxa la filayo markaad bogsato inta aad ku jirto qeybta ku-tiirsanaanta sare ama qaybta daryeelka xooggan.

Waa maxay suuxdintu?

Suuxdinta waxay joojisaa dareenka xanuunka iyo dareemada aan fiicneyn. Waxaa loo sameyn karaa qaabab badan, mana ahan shardi goor kasto inay kaa dhigto qof miyir-daboolan.

Waxaa jira noocyo kala duwan oo suuxdin ah, kuwaasoo ay ku xirantahay qaabka loo bixiyo:

- **Suuxdin maxali ah** Waxay ku lug leedahay cirbado kuwaasoo dareenka ka qaada qeyb yar oo jirkaaga kamid ah. Waad miyir qabeysaa laakiin xanuun ma dareemeysid
- **Suuxdin goboleed** (sida laf-dhabarta ama mid toos loogu mudo xuubka sare ee ku dahaaran maskaxda iyo xangullaha) waxay ku lug leedahay irbado dareenka ka qaadayo qeyb weyn ama qoto dheer oo jirka kamid ah. Waad miyir qabi doontaa ama waxaad noqoneysaa qof hurdeysan, laakiin waad ka madax bannaan tahay xanuun, in kasta oo laga yaabo inaad dareento cadaadis ama dareen wax ku mud-mudaayo oo kale.
- **Suuxinta guud** waxay ku galinaysaa xaalad miir-daboolnaan ah. Waxay muhiim u tahay qalliinnada iyo nidaamyada qaar. Waxaad tahay qof miyir-daboolan oo aan dareemeyn.
- **Hurdisiin ama seexin** waxay sameysa xaalad 'hurdo u eg' ah, inta badanna waxaa loo adeegsadaa suuxinta maxaliga ama goboleedka ah. Dejinta waxay noqon kartaa mid fudud ama qoto-dheer waxaana laga yaabaa inaad xasuusato wax kasto, waxyaabaha qaar ama aadan xasuusan waxbo kadib Dejinta.

Macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan xaalada seexinta, fadlan eeg buug-yaraheenna lagu sharaxay xaalada seexinta ee 'Sedation' oo laga heli karo boggeena: www.rcoa.ac.uk/patientinfo/sedation

Dhakhaatiirta Suuxdinta

Dhakhaatiirta suuxdintu waa Dakhaatiir leh tababar takhasuseed kuwaasoo:

- Kaala hadla nooca ama noocyadaa suuxinta ku haboon qalliinkaaga Haddii ay jiraan ikhtiyaaro kale, waxay kugu caawinayaan inaad kala doorato
- Adiga kaala hadla halista suuxinta
- Kula gaaro qorsho is-afgarad kusaabsan suuxdintaada iyo xanuun-xakameynta qalliinka ka dib
- kusiinaya daawada suuxdintaada kana masuul ah badbaadada iyo bad-qabkaaga guud ahaan qalliinkaaga iyo gudaha qolka soo bogsashada.

Waxa kale oo aad la kulmi kartaa howl-wadeennada qeybta Suuxdinta kuwaas oo ah xirfadlayaal daryeel caafimaad oo aad u tababararan. Waxaad ka akhrisan kartaa wax badan oo ku saabsan kaalintooda iyo kooxda suuxinta boggeena:

www.rcoa.ac.uk/patientinfo/anaesthesia-team

Qalliinka ka hor

Haddii aad u ballansantahay qalliin, waxaa jira waxyaabo badan oo aad samayn karto si aad isugu diyaariso qalliinka ka hor.

- Haddii aad sigaar cabto, joojinta dhowr toddobaad kahor qalliinka waxay yareyn doontaa halista dhibaatooyinka ku imaan kara neefsashada inta lagu jiro suuxintaada iyo qalliinkaaga kadib.

- Haddii aad si xad-dhaaf ah u cayilan tahay, yareynta khatarta miisaankaagu wuxuu yareyn doonaa khataraha badan ee xaga suuxdinta kaaga imaan kara, sidoo kale waxaa uu kor u qaada kaso kabashadaada qalliinka. Waxaa laga yaabaa in lagu qoro cunto gaar ah todobaadka ka horreeya noocyada qalliinka qaarkood.
- Haddii aad leedahay ilko dabacsan ama daboolan, Daawo aad ka soo qaadato xaga dhakhtarkaaga ilkaha kahor qalliinka ayaa yareyn karta halista dhaawaca ilkahaaga soo gaari kara inta lagu guda jiro suuxdinta.
- Haddii aad qabtid dhibaato caafimaad oo muddo dheer jirtay (tusaale ahaan cudurka macaanka, neefta ama boronkiitada, dhibaatooyinka qanjirka tayroodhka, dhibaatooyinka wadnaha ama dhiig-karka), waa inaad iska hubisaa adigoo GP-gaaga (Dhakhtarkaaga guud) Qalliinka u tagaya si uu kuugu sheego waxyaabaha aad ka qaban kartid.
- Kordhinta Dhaqdhaqaaqaga toddobaadyada qalliinka ka horeya ayaa kor u qaadi karta shaqada wadnahaaga iyo heerka jir-dhiskaaga. Daraasadyo la sameeyey ayaa muujiyey in is-badal weyn ay ku yeelan karto kasoo kabashadaada Qalliinka.
- Waxaa ugu fiican in hore loo sii qorsheeyo raysashadaada/bogsashada ee guriga ka dib, oo la ogeysiiyo asxaabtaada iyo qoyskaaga sida ugu wanaagsan ee ay kuu caawin karaan. Ka fikir waxa aad cuni doontid iyo haddii aad u baahan tahay inaad is beddel ka sameyso gurigaaga si ay u fududaato ladnaanshahaagu.
- Waa muhiim inaad ka fikirto sida ugu fiican ee aad u bixin karto waqtiga maalinta qalliinkaaga maadaama laga yaabo inaad sugto ka hor qalliinka. Wargeeysyada, hal-xiraalayaasha ama dhagaysiga muusig iyadoo la isticmaalayo qalabka dhegaha ayaa dhamaantood waxtar yeelan kara.

Macluumaadkeena la dhaho sifiican iyo si fiican iyo si deg-deg ah uga bogsashada qalliinka: waxey si dhaqso ku siin doonaan macluumaadka aad ugu baahan tahay si inaad u noqoto mid sida ugu habboon oo ugu fiican ugu diyaargarooma qalliinkiisa. Fadlan eeg bogeenka internetka wixii macluumaad dheeraad ah: www.rcoa.ac.uk/fitterbettersooner

Rugta qiimeynta caafimaadka ka hor qalliinka (rugta qiimaynta qalliinka kahor)

Sida caadiga ah waxaa lagugu wargelin doonaa inaad timaado rugta qiimeynta qalliinka kahor, dhowr toddobaad ka hor qalliinkaaga. Waxaa faa'iido leh inaad soo kaxaysato xubin qoyska kamid ah ama saaxiib si uu kuu taageero/garab-istaago. Fadlan la imow:

- Qoraal-daaweedka dhaqtarka (warqadaha dawada) ama keen dawooyinkaaga siday dhamaan u baakadeeysanyihiin
- macluumaad kasta oo aad ka haysato baaritaannadaada iyo daaweyntaada isbitaallada kale
- macluumaad ku saabsan wax kasta oo xasaasiyad ama dhibaatooyin ah oo adiga ama qoyskaagu ku qabay suuxinta
- cabirrada dhiig karka ee aad dhowaan iska qaadday

Kalkaaliso ayaa ku weydiin doonta su'aalo faahfaahsan oo ku saabsan heerarka caafimaadkaaga iyo waxqabadkaaga.

- Baaritaannada dhiigga, ECG (baaritaanka wadnaha) iyo mararka qaarkood baaritaanno kale ayaa la samayn doonaa ama la dalban doonaa. Waxaa laga yaabaa in lagu weydiyo inaad samayso CPET (baaritaanka jimicsiga wadnaha iyo sambabada) ayadoo la adeegsanaayo baaskiilka jimicsiga si loo eego sida wanaagsan ee wadnahaaga iyo sanbabahaaga u shaqeeynayaan xilliga nasashada iyo jimicsigaba. Tan waxaa loo isticmaali karaa in loo kaalmeysto in lagu saadaaliyo sida wanaagsan ee jirkaagu ula qabsan doono qalliinka iyo bogsashada. Waxay ka caawin doontaa dhakhaatiirta inay go'aan ka gaaraan halista qalliinka kaa soo gaari karta adiga iyo haddii aad u baahan tahay inaad gasho qaybta ICU ama HDU.
- Dhakhtarkaaga suuxdinta ayaa kaala hadli doono suuxinta iyo khataraha adiga kuu gaarka ah. Haddii tan aad heli wayso oo aad rabto inaad la hadasho dhakhtark suuxiye ah, waa inaad codsataa in taas lagu diyaariyo.
- Haddii aad qabtid xaalado kale oo caafimaad (tusaale ahaan sonkorowga, neefta, dhiig karka ama qallalka), shaqaalaha rugta caafimaad ayaa kaa wareysan doona xaalahaas. Haddii la daaaweyn karo, waxaa laga yaabaa in lagaa codsado inaad aragto khabiirro kale ama GP-gaaga (dhakhtarkaaga guud). Isbeddellada daaweyntaada ayaa mararka qaarkood laga yaabaa inay lagama maarmaan noqoto. Mararka qaar qalliinkaagu wuxuu u baahan karaa in dib loo dhigo ilaa caafimaadkaagu ka soo raynaayo.
- Kalkaalisada ayaa ku siin doonta xog ku saabsan waxa dhaca qalliinka ka hor, inta lagu jiro iyo ka dib. Tani waa wakhti ku habboon in su'aalo la weydiyo oo laga doodo wixii walaac ah.
- Waxaa lagu siin doonaa filmaamo cad oo ku saabsan goorta la joojinayo cuntada iyo cabitaanka qalliinkaaga ka hor. Waa muhiim in la raaco taladan. Haddii cunto ama dareere ku jiraan calooshaada inta lagu guda jiro suuxdinta, waxay ku soo bixi kartaa dhuuntaada kadibna geli doonaan sambabkaaga.
- Sidoo kale waa in lagu siiyaa filmaamo ku saabsan daawooyin kasta oo aad qaadato, iyo inaad sii wadato qaadashada ilaa maalinta qalliinkaaga.

Ma waxaadka fikireysaa khataraha

Dhakhtarkaaga qalliinka iyo dhakhtarkaaga suuxiyaha ayaa ku siin kara macluumaad ku saabsan waxa ay u maleynayaan in halista iyo faa'iidooyinka qalliinka ay adiga kuu yihiin. Waxay kaloo kuu sheegi karaan halista ka imaan karta qalliin la'aanta, iyo daaweyn kasta oo kale. Xaaladaha qaarkood dhakhaatiirtaadu waxay kuu soo jeedin karaan in qalliinku yahay mid aad halis u ah ayna u badan tahay inaan lagu guulaysan.

Dadka waa ay ku kala duwanyihiin halista ay diyaar u yihiin in ay u bareeraan. Dhakhaatiirtaada ayaa kuu sharxi doono khataraha, laakiin adiga kaliya ayaa gaari kara go'aan ka ah in aad qalliinka gashid. Waxba kuguma dhacaayo ilaa aad ka fahantid oo aadna ka oggolaanayso waxa adiga lagu qorsheeyay. Waxaad xaq u leedahay in aad diido haddii aadan rabin qalliinka.

Maalinta qalliinka

Waa lama huraan in aad raacdo tilmaamaha lagu siiyay ee ku saabsan cunista, cabista iyo qaadashada daawooyinkaaga iyo kaniinnadaada.

La kulanka dhakhtarka suuxiyaha

Dhakhtarkaaga suuxiyaha ayaa kula kulmi doona qalliinka ka hor. Suuxiyaha waa dhakhtar ku takhasusay suuxdinta, daaweeynta xanuunnada iyo daryeelka bukaannada ku jira qaybta daryeelka xooggan ee ICU. Waxaa laga yaabaa in ay:

- ku weydiyaan mar kale caafimaadkaaga, iyo in ay caddeeyaan ama hubiyaan macluumaadkaaga in lagu diiwaan geliyay qeybta qiimeynta qalliinka kahor
- dib u eegaan natiijada baaritaannadaada
- dhageystaan wadnahaaga iyo sambabadaada
- fiiriyaa qoortaada, afkaaga iyo ilkahaaga.

Dhakhtarta suuxiyaha ayaa kaala hadli doona suuxdinta, wixii nidaam kale dheeraad ee loo baahan kara si lagu daryeelo inta uu qalliinka socda, iyo kaala hadli doono hababka kala duwan ee xanuun baabi'inta. Wax ay kaaga jawaabi doonaan su'aallahaaga iyo waxa ay kaala hadli doonaan walaac kasta oo kugu soo kordha.

Su'aalaha aad jeceshahay inaad weydiiso dhakhtarka suuxiyaha.

- Yaa suuxinta isiin doona?
- Xanuun baabi'n habkee ah ayaad igula talinaysaa?
- Habab kale oo xanuun baabi'in oo ka duwan ma jiraa?
- Waa maxay khataraha ka imaan kara suuxdinta noocan ah?
- Wax khatar ah oo gaar ah miyay ii leedahay aniga?
- Sidee baan dareemi doonaa intaa kadib?
- Intee in la eg ayaan ku jiri doonaa qeybta daryeelka gaarka ah ee ICU?
- Dhaqtarkeen daaweeyntiisa u baahan doonaa inta aan ku jiro qeybta daryeelka gaarka ah?

U diyaargarowga qalliinkaaga

- Waxaa lagu dalban doonaa inaad dhar beddelato, oo aad xerato guntiinnada qolka qalliinka. Waxaana laga yaabaa in lagu cabbiro sharabaadadyada (iskaarshooyinka) cadaadiska. Xirashada kuwani waxay kaa caawinayaan ka hortagga xinjiro dhiig oo ku samaysma lugahaaga.
- Waxaa laga yaabaa in lagaa qaado baaritaanno dhiig oo dheeraad ah.
- Xubin ka tirsan shaqaalaha ayaa dhammaystiri doona liiska hubinta oo kuu kaxayn doona qolka qalliinka. Waxaad u lugayn doontaa qolka qalliinka ama waxaad isticmaali doontaa kursiga curyaanka ama gaari -gacmeedka.

- Haddii aad xerantahay muraayadaha indhaha, qalabka kaalaha maqalka ama ilkaha kuu xeranyihiin, waad xirnaan kartaa si aad u aaddo qolka qalliinka. Waxaad u baahan doontaa inaad iska saarto ka hor inta suuxdintu bilaaban si aanay u dhaawacmin ama u kala firdhismin.

Waaxda qalliinka ('qolka qalliinka')

Markaad timaado aagga qolka qalliinka, xubnaha shaqaalaha ka ah ayaa xaqiijin doona aqoonsigaaga, qalliinka aad galeyso, iyo xasaasiyad kasta oo aad qabtid. Haddii aad qabtid wax su'aalo ah ama walaacyo ah, waa inaad u sheegtaa xubin ka tirsan shaqaalaha.

- Dhakhtarkaaga suuxinta, xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka ee caawiya suuxiyaha iyo kalkaaliyaasha qolka qalliinka ayaa u joogi doona inay ku daryeelaan. Waxa kale oo laga yaabaa inay joogaan suuxiyayaal ku jira tababarka iyo arday caafimaadka.
- Mashiinnada ayaa laguugu xeri doonaa kuwaasoo si joogto ah ula socda garaaca wadnahaaga, cadaadiska dhiigga iyo heerarka oksijiintaada. Suumanka dhegdhega ah ayaa xabadkaaga lagu dhajin doonaa si loola socda wadnahaaga. Sidoo kale qayb yar oo fartaada ama dhegtaada kamid ah ayaa la isticmaali doonaa si loo cabbiro heerka oksijiinta ee dhiiggaaga.
- Dhaqtarkaaga suuxinta wuxuu marka hore adeegsan doonaa cirbad si uu geliyo kaanool (tuubo dhuuban oo caag ah) xididka gacantaada. Tan waxaa loo isticmaalaa si laguugu xero faleebo lagaa siiyo daawooyin iyo dareere inta lagu jiro qalliinka.
- Iyada oo ku xirantahay nooca qalliinka, iyo caafimaadkaaga guud, dhakhtarka suuxiyaha ayaa laga yaabaa inuu kaanool kale kaaga xero halbowlaha gacanta. Daawada suuxdinta ee maqaarka ayaa marka hore la isticmaali doonaa si tan looga dhigo mid aan dhib laheyn. Kaanoolkan waxaa loogu yeeraa qadka halbowlaha. Waxay u oggolaanaysaa in cadaadiska dhiiggaaga si joogto ah loo cabbiro sidoo kale waxaa loo isticmaali karaa baaritaanno dhiig oo dheeraad ah inta qalliinka lagu jiro.
- Haddii ay suuxdinta tahay mid aad ka qaadaneysid laf -dhabarka ama mid toos loogu mudo xuubka sare ee ku dahaaran maskaxda iyo xangullaha si loo yareeyo xanuunka, tan badanaa waa la samayn doonaa ka hor intaadan gelin suuxinta guud.

Marka dhammaan diyaargarowga la dhammeeyo, dhakhtarta suuxiyaha ayaa ku siin doona maaskaro oksijiin aad neefta ka qaadato, isagoo si tartiib ah kaanoolka kaa siinaaya dawada suuxdinta. Laga soo bilaabo meeshan, ma dareemi (ama ogaan) doontid wax kale ilaa qalliinka la dhammeeyo.

Ka dib marka lagu suuxiyo, qalliinnada qaarkood waxaa laga yaabaa inaad sidoo kale laguugu xiro:

- tuubo neefsasho oo la geliyo hunguriga cad
- Kaanool weyn oo lagu xiriiriyo xididka (arooriyaha) qoortaada, lafta kalxanta hoosteeda, ama gumaarka. Tan waxaa lagu magacaabaa khadka dhexe ee cadaadiska arooriyaha. Waxaa loo isticmaalaa in lagaa siiyo dareereyaal, laga cabbiro cadaadiska dhiiga iyo/ama lagaa siiyo daawooyin lagu maareynayo cadaadiska dhiiggaaga inta qalliinka lagu jiro iyo ka dib

- gacanka ultrasound (kumbuyuutar lagu ogaado uur kujirta) ka ayaa la geliyo hunguriga (tuubada cuntada) iyadoo loo maraaya sanka sanka ama afka. Tani waxay ka caawineysaa dhakhtarta suuxiyaha inuu qiimeeyo inta dareere ah ee lagu siinaayo, wuxuuna la socon karaa shaqada wadnahaaga
- tuubo sanka la soo marsiinaayo oo calooshaada la gaarsiinaayo taas oo calooshaada ka dhigaysa mid maran (eber ah) inta qalliinka lagu jiro iyo ka dib
- tuubo lagu xiriirinaayo kaadiheystaada (kateetar) oo ka dhigaysa kaadiheysta mid maran. Waxa kale oo loo isticmaalaa in lagu cabbiro xaddiga kaadida ee kelyahaagu soo saaraan qalliinka iyo wixii ka dambeeya xilliga qalliinka iyo ka dib.

Dhiiga kushubista

Ku -shubidda dhiiggu waa suurtoagal inta lagu jiro dhammaan qalliinnada waaweyn. Dhiigga waxaa la siiyaa oo keliya haddii ay daruuri tahay. Haddii aadan rabin in lagugu shubo dhiig waa inaad tan kala hadashaa dhakhaatiirtaada kahor maalinta qalliinkaaga.

Waxaad ka heli kartaa wax badan oo ku saabsan ku -shubidda dhiigga iyo wixii kale ee beddeli kara haddii aad xilli hore weydiiso dhakhtarta suuxiyaha. Ama waxaad booqan kartaa shabakadda adeegyada Dhiigga ee NHS:

www.nhsbt.nhs.uk/what-we-do/blood-services/blood-transfusion

Xanuun baabi'in

Xanuun baabi'in wanaagsan waa muhiim. Waxay kaa dhigaysaa qof fayoow, waxay kaa caawineysaa inaad dhakhso u bogsato, waxaana laga yaabaa inay yareeyso fursadaha ay kugu soo gaari lahaayeen dhibaatooyinka qaarkood:

- Haddii aad si qoto dheer u neefsan karto oo aad si fiican u qufaci kartid qalliinkaaga ka dib, waxay u badan tahay inaad qaadi doonin caabuqa feeraha.
- Haddii aad lugahaaga dhaqaajin karto oo aad socon karto, ma kugu dhaceeyso xinjirowga dhiigga ee xididdada lugaha (xinjirowga ka dhex dhaca xididdada arooryada gudaha ee laba addin ee hoose ama DVT) ama meelo kale.

Waxaa lagu siin doonaa xanuun joojiye joogto ah ama kiniin ahaan ama dareere ahaan afka lagaa siiyo, ama kaanoolka . Waxaa laga yaabaa inay kugu habboon tahay inaad haysato mid ama in ka badan oo ka mid ah noocyada soo socda ee xanuun joojinta, oo dhakhtarta suuxiyaha uu kaala hadli doono.

Suuxdinta laga qaato xubka sare ee ku dahaaran maskaxda iyo xangullaha

Dhakhtarkaaga suuxinta wuxuu isticmaalaa irbad si uu u geliyo tuubo caag ah oo u dhexeysa lafaha dhabarkaaga. Tan badanaa waxaa la sameeyaa ka hor intaadan seexan (suuxin). Daawada suuxinta maxalliga ah waxaa bukaannada laga siiyaa tuubadan inta lagu jiro qalliinka, iyo dhowr maalmood ka dib. Laabtaada, calooshaada iyo lugahaagu ayaa dhici kara in aad ka dareentid kabuubyo marka la isticmaalayo suuxdinta laga qaato xubka sare ee ku dahaaran maskaxda iyo xangullaha, lugahaagana waxaa laga yaabaa in ay tabar dhigaan. Tani waa in la fisho inta suuxdinta laga qaato xubka sare ee ku dahaaran maskaxda iyo xangullaha ay shaqeynayso oo ay caadi ku soo laaban doonto marka suuxdinta maxalliga meesha ka baxdo.

Suuxinta laf dhabarta

Daawada suuxdinta maxalliga ah waxaa laga qaataa irbad lagu duray inta u dhexeysa lafaha dhabarkaaga hoose si loo dareen tiro neerfayaasha dhexda ilaa suulasha. Dareen la'aanta caadi ahaan waxay socotaa inta u dhaxaysa laba ilaa afar saacadood. Waxa kale oo laga yaabaa in lagu mudo dawada xanuunka joojiyaha oo muddo dheer shaqaynaysa, taas oo socon karta 12 saacadood ama ka badan.

Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan waxyeellooyinka iyo dhibaatooyinka labada nuuc ee suuxdinta, fadlan ka eeg boggeena internetka: www.rcoa.ac.uk/patientinfo iyo www.rcoa.ac.uk/patientinfo/risks/risk-leaflets

Xanuun baabi'ye maareyntiisa leeyahay bukaanka (PCA)

Kani waa nooc ka mid ah xanuun joojiyaha oo aad adigu xakamaynayso Bamka ay ku jirto cirbadda moorfiinka (ama xanuun baabi'ye la mid ah) ayaa ku xiriisan kaanoolkaaga. Waxaa gacanta lagaa saaraayaa badhan yar oo aad taaban kartid marka aad u baahatid xanuun baabi'iyaha si uu bamka kuu siiyo. Markaad riixdid badhanka, qiyaas yar ayuu ku siinaayaa Bamka ayaa leh qeyb badbaadin ah oo ka hortageysa in aad si lama filaan ah u qaadatid in ka badan intii laguugu tala galay.

Kateetarka nabrada

Daawada suuxdinta maxalliga waxaa la iska siiyaa aagga ku hareereysan nabarkaaga iyadoo loo marinayo hal ama dhowr tuubooyin oo caag ah. Ujeedadu waa in la dareen tiro aagga ku wareegsan nabarka. Dhakhtarka qalliinka ama dhakhtarta suuxiyaha ayaa tuubooyinkaas kugu xiriirinaaya inta qalliinka lagu guda jiro. Waxay ku xiran yihiin mashiin si joogto ah u bixiya suuxinta maxalliga ah. Kateetarka nabarka wuxuu kugu xernaan karaa dhowr maalmood qalliinkaaga ka dib.

Dadka qaarkood, qaabka xanuun baabi'inta loo qorsheeyay ayaa laga yaabaa inuu loo baahdo in la beddelo qalliinka ka dib.

- Dadka qaarkood waxay u baahan yihiin xanuun-baabi'ye ka badan kuwa kale ama waxay si kala duwan uga fal-celiyaan daawooyinka xanuunka yareeya. Dareenka walwalka wuxuu kordhin karaa xanuunka ay dadku dareemaan.
- Haddii aad xanuun qabto, qiyaasta xanuunka baabi'yaha lagu qoro waa la kordhin karaa, marar badan ayaa la siin karaa, ama waxaa lagu siin karaa isku-darka dhowr nooc oo xanuun baabi'iyeyaal kala duwan ah.
- Mararka qaarkood, xanuunku waa calaamad digniin ah in xaaladda jirka aysan fiicnayn, marka waa inaad u sheegtaa shaqaalaha ku daryeelaya haddii aad xanuun dareento.

Qalliinka ka dib

Dadka badankoodu waxay ku soo miyirsadaan doonaan qeybta raysashada qalliinka ka dib. Kalkaaliso ka mid ah kuwa ka howlgala qeybta raysashada qalliinka ka dib ayaa kula joogi doonta mar walba. Dadka qaar ayaa toos loo geeyaa qeybta daryeelka gaarka ah ee ICU.

Waxey:

- isha ku heyn doonaan cadaadiska dhiiggaaga, heerarka ogsijiinta iyo garaaca wadnaha
- oksijiin kugu siin doonaan maaskaro ama tuubooyin caag ah oo lagu xiriiryo sanko
- qiimeyn doonaan heerka xanuunkaaga oo intaas ka dib ku siin doonaan xanuun-baabi'ye haddii loo baahdo
- ku siin doonaan daawooyinka ka hortagga matagga iyo yareynta lallabada (yalaalugo) haddii aad dareentid matag iyo lallabo
- kugu dabooli doonaan buste ku siinaya diirimaad haddii aad qabow dareemeysid
- kuu soo celin doonaan qalabka kaalaha ilkahaaga, qalabka kaalaha maqalka iyo muraayadaha indhaha markaad soo miyirsato.

Haddii aad xanuun baabi'inta ka qaadatay epidural-ka (xubka sare ee ku dahaaran maskaxda iyo xangullaha), kalkaaliyaha qeybta raysashada ayaa hubin doona si uu u arko waxtarkiisa. Haddii aadan ku qanacsanayn, dhakhtarta suuxiyaha ayaa is-beddel ku sameyn doona epidural'ka ama ku siin doona xanuun -baabi'ye dheeraad ah.

Qeybta daryeelka gaarka ah ama ku-tiirsanaanta sare (HDU)

Markaad soo miyirsato oo aad nasato, waxaa lagaa rari doona qeybta soo kabashada oo lagu wareejin doona qeybta daryeelka gaarka ah ee ICU ama HDU, halkaas oo aad ka heli doonto ka warqab dheeraad ah iyo daaweyn takhasus leh haddii loo baahdo.

Marmar, waxaa lagama maarmaan ah in la sii wado suuxdinta marka qalliinku dhammaado dhowr saacadood ka dib, ama ilaa xaaladdaadu noqoto mid deggan. Haddii aad u baahan tahay daryeel noocan ah, dhakhtarta suuxiyaha ayaa toos kuu geeyn doona qeybta ICU qalliinkaaga ka dib. Suuxdinta ayaa sii socon doonta waxaana la isticmaali doona mashiinka neefsashada si loo xakameeyo neefsashadaada. Marka xaaladaadu kuu saamaxdo, kooxda ICU ga waxay kuu oggolaan doonaan inaad iskaaga u neefsato (bilaa mashiin) oo si tartiib tartiib ah ayaad u soo naaxi doontaa.

HDU ama ICU -da, waxaa kugu daryeeli doona dhakhaatiir, kalkaaliyayaal, fiisioterabi -yaqaanka iyo dhakhaatiirta cuntada oo ku takhasusay qeybt daryeelka ku -tiirsanaanta sare iyo daryeelka gaarka ah. Waxay si dhow ula shaqeeyaan kooxda qalliinka si loo hubiyo in bogsashadaadu si fiican u socoto. Inta soo kabashadaadu socoto, waxaa laga yaabaa in lagaa wareejiyo qeybta ICU -ga oo lagu wareejiyo qeybta HDU.

Waxaa laga yaabaa inaad yeelato kalkaaliso adiga kuu gaar ah, ama hal kalkaaliye oo daryeela laba bukaan kasta. Waxay hubin doonaan inaad ku qanacsan tahay

waxayna siin doonaan dawooyin lagu qoray si loo xakameeyo jirrada iyo ka - hortagga xinjirrada dhiigga. Qaar ka mid ah dawooyinka aad guriga ku qaadanaysay ayaa laga yaabaa in la joojiyo ama la beddelo si ay kaaga caawiso bogsashadaada. Marka hore waxaad u baahan doontaa faleebo si dareeyaasha lagaaga siiyo xididdadaada, laakiin kalkaalisadaadu waxay kugu dhiirri -gelin doontaa inaad cabto oo aad cunto sida ugu dhakhsaha badan ee aad awooddo maadaama ay tani kaa caawinayso bogsashadaada.

Inta aad ku jirtid ICU ama HDU, garaaca wadnahaaga, cadaadiska dhiigga, neefsashada, iyo shaqada kelyaha ayaa si dhow loola socon doonaa. Waxa kale oo laga yaabaa in lagaa qaado baaritaanno dhiig, raajato ama baaritaanno kale si loo hubiyo horumarka bogsashada ama lagu ogaado wixii dhibaato ah. Inta ay soo kabashadaadu sii socoto, waxaad u baahan doontaa kormeer yar, oo qaar ka mid ah faleebooyinkaaga, tuubooyinka iyo agabka ka warheynta xaaladdaada caafimaad ayaa lagaa saari doonaa.

Kalkaaliyeyaasha iyo fiisiyo -teraabiyada ayaa ku bari doona jimicsiyada neefsashada ee joogtada ah. Aad bay muhiim u tahay inaad si qoto dheer u neefsato oo aad si fiican u qufacdo inta aad ku jirto qeybta ICU ama HDU. Tani waxay kaa caawin doontaa in ay kaa fogeeyso inuu kugu yimaado caabuqa feeraha.

Dhakhaatiirta jimicsiga ayaa sidoo kale kaa caawin doona inaad sariirta ka kacdo oo dhaqso u dhaqaaqdo. Tani waxay kaa caawineysaa jimicsiyadaada neefsashada. Dhaqdhaqaaqa iyo socodku waxay si gaar ah muhiim ugu yihiin ilaalinta muruqaaga, hagaajinta wareegga iyo isu-socodka dhiigga ee xididdada lugaha iyo kor u qaadida ladnaantaada.

Waa lagu soo booqan karaa intaad ku jirto qybtu ICU ama HDU. Kalkaaliyahaaga kaala talinaayo waqtiyada booqashada iyo tirada booqdayaasha la oggol yahay. Waxaa laga yaabaa in lagugu xanaaneeyo meel ay joogaan bukaanno kale oo aad u xanuunsan. Waxaa laga yaabaa inaanay ku habboonayn carruurta yaryar inay soo booqdaan, haddii ay hawl badani jirto, waxaa laga yaabaa in loo baahdo in xad loo yeelo booqashada si ku meel gaar ah.

Ku noqoshada Qolka

Marka kooxda ku daryeeleysa ay ku qanacdo inaad si dhammeystiran u bogsato, waxaad ku noqon doontaa qeybta qalliinka.

Muddada aad ku qaadanayso ICU ama HDU waxay ku xirnaan doontaa nooca qalliin ee lagugu sameeyay, wixii dhib ah ee ka dhasha qalliinka, iyo dhibaatooyin caafimaad oo kasta oo aad yeelan karto.

Waa maxay khataraha?

Dadku way ku kala duwan yihiin sida ay u tarjumaan ereyada iyo tirooyinka. Qiyaastan waxaa loosoo saaray si caawimaad looga helo.

Qalliinka

Halista qalliinkaagu waxay ku xiran tahay nooca qalliinka aad samaynayso, taam ahaansahaaga guud, iyo dhibaatooyin caafimaad oo kasta oo kale oo aad qabto. Ka fekerida khatarahaan waxay kugu abuuri kartaa xoogaa walaac ah, laakiin waxaa muhiim ah inaad isbarbar dhig ku samayso cawaaqibka ka dhalan kara qalliinka. Dhakhtarkaaga qalliinka iyo dhakhtarta suuxiyaha ayaa awoodi doona inay kaa

caawiyaan inaad isbarbar dhigto khatarahaan, iyadoo ay ku xirantahay duruufahaaga gaarka ah.

Dhakhtarkaaga suuxiyaha

Waxaa jira dhibaatooyin ama dhacdooyin la xiriira suuxdinta lafteeda. Qaar ka mid ah kuwani si caadi ah ayay u dhacaan, laakiin guud ahaan way yar yihiin ama waxey qaataan wakhti yar. Dhibaatooyin halis ah ayaa dhaca, laakiin kuwani waa kuwo naadir ah.

- Dhacdooyinka caadiga ah waxaa ka mid ah: dareemid xanuun iyo matag, dhuun xanuun, gariir, cuncun, barar ku yimaada meelaha faleebbada lagaga xeray, xanuun caabuq feeraha gala, iyo inyar oo wareer ah oo ku meelgaar ah.
- Dhibaatooyinka aan caadiga ahayn waxaa ka mid ah: neefsashada oo ku adkaata markey suuxdinta dhammaato, dhaawaca ilkaha, dhibaatooyinka caafimaad ee horay u jiray oo sii xumaanaya, iyo miyir-qabka xilliga suuxdinta.
- Dhibaatooyin dhif ah oo aad dhif u ah waxaa ka mid ah: dhaawaca indhaha, xasaasiyad daran oo laga qaado daawooyinka, iyo dhaawaca neerfeyaasha. Dhimashada ay toos u keento suuxdintu waa mid aad dhif u ah, waxaana lagu qiyaasaa inay ku dhacdo 1 qof 100,000 oo qof oo gala suuxdin, gudaha UK.

Macluumaad dheeraad ah

Dhakhtarkaaga suuxinta ayaa kaala hadli doona haddii aad leedahay khataro gaar ah marka la barbar dhigo khataraha caadiga ah ee la taxay.

Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan khataraha shaqsiyeed ee suuxdinta iyo soo koobidda dhacdooyinka iyo khataraha guud, fadlan eeg macluumaadka laga heli karo websaydkeenna: www.rcoa.ac.uk/patientinfo/risks/risk-leaflets

Ilaha macluumaadka ee dheeraadka ah

Waxaad ka heli kartaa buug yareyaal ay ku qoranyihiin macluumaad dheeraad ah websaydka Kulliyadda: www.rcoa.ac.uk/patientinfo. Buug yarahan waxaad ka heli kartaa waaxda suuxdinta ama rugta qiimeynta qallinka ka hor ee isbitaalkaaga.

Ururka Daryeelka Gaarka ah wuxuu hayaa ilo waxtar u leh bukaannada iyo daryeelayaasha daryeelka gaarka ah: www.members.ics.ac.uk/ICS/patients-and-relatives.aspx

Waxaan aad ugu dadaalaynaa in macluumaadka ku jira qoraalkan yar ay noqdaan kuwo sax ah oo ilaa hadda, laakiin annagu ma ballan qaadi karno tan. Uma fileynno macluumaadkan guud inuu daboolayo dhammaan su'aalaha aad qabtid ama waxkasta oo aad kuugu muhiim kuu ah. Waa inaad kala hadasho xulashooyinkaaga iyo wixii walwal ah ee aad ka qabto kooxda caafimaadkaaga, adoo u isticmaalaya buug-yarahaan sidii hagge ahaan. Buug-yarahaan keligiis looma tixgalin doono talo ahaan. looma isticmaali karo ganacsi ahaan ujeedo. Qiimayn buuxda, fadlan halkaan riix (www.rcoa.ac.uk/patient-information/translations/somali).

Dhamaan turjumaadahan waxaa bixiya Translators without Borders' (Turjubaanada bilaa xuduudaah') bulshada turjubaanka. Tayada tarjumaadahaan waxaa loo hubiyaa inay ka dhigayaan tarjumaadaha sida ugu macquulsan, laakiin waxaa jirta halis ah khaladaad iyo marin habaabinta macluumaadka qaar.

Noo sheeg waxay kula tahay

Waxaan soo dhaweyneynaa talooyin ka si kor loogu qaado tayada buugyarahan.

Haddii aad haysid wax faalo ah oo aad jeceshahay Inaad nala waadaagto fadlan ku soo hagaaji: patientinformation@rcoa.ac.uk

Kulliyadda Boqortooyada ee Dhakhaatiirta Suuxdinta

Churchill House, 35 Red Lion Square, London WC1R 4SG
020 7092 1500

www.rcoa.ac.uk

Daabacaaddii labaad, Febraayo 2020

Buugyarahan waxaa dib u eegis lagu sameyn doonaa saddex sano gudahood, laga bilaabo taariikhda daabacaadda.

© 2020 Kulliyadda Royal ee Dhakhaatiirta Suuxdinta.

Buugyarahan waa la badin karaa ayadoo ujeeddadu tahay kaliya in bukaannada loo soo saaro macluumaad anfacaaya. Fadlan dhowr xuquuqda oo xus halka aad ka soo xigatay. Haddii aad dooneysid in aad ku isticmaasho qayb ka mid ah buugyarahan daabacaad kale, waa in aad ku muujisaa qaybta horudhaca astaamaha, sumadaha iyo sawirrada aad ka reebtay. Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan nagala soo xiriir.